CODSIGA BARNAAMIJKA IYO HESHIISKA

Barnaamijka Incarceration Program (CIP) waa barnaamij xarun ciqaabeed ah oo xooggan, lehna qaab dhismeed habaysan, nidaam adag, iyo isla xisaabtan heer sare ah oo lagu maamulo dadka xiran, iyadoo si toos ah loogu xiro cawaaqib la xiriira iyo kuwa dheeraad ah haddii qofka xiran uu ku fashilmo buuxinta filashooyinka dabeecadeed.

Barnaamijka CIP waxa uu ku shaqeeyaa iyadoo lagu hagayo Xeerarka Minnesota 244.17, 244.171 iyo 244.172 iyo Sharciga DOC 204.060, “Challenge Incarceration Program - Phase I.”

Shuruudaha U-qalmitaanka CIP: Qofka xiran waxaa looga baahan yahay in ay uga harsan tahay wax ka yar 13 bilood ayaa ka harsan laga bilaabo taariikhda la filayo in lagu daro CIP ilaa maalinta sii daynta xilligeeda (CRD).

Qof xiran oo u qalma	• Kuwa jebiyey shuruudaha sii-daynta, waa inay dhammaystiraan muddada dib loogu soo xidhay ka hor inta aan dib loogu sii dayn Marxaladda II • Kuwa hore uga qayb galay CIP, waxa ay mar kale ku biiri karaan CIP iyadoo lagu saleynayo isla waajibaadkii hore, iyadoo go’aankaasi uu ku xirnaan doono Taliyaha guud

Qof xiran oo aan u qalmin:
Qofka lagu xukumay oo loo wareejiyey Taliyaha Waaxda Xeer-ilaalinta tobankii sano ee ugu dambeeyey, xukun ciqaabeedna lagu riday dambiyada hoos ku xusan: dil, dil shil ah, fal kufsi , weerar, afduub, dhac, gubid , qafaalasho gaari , ama dambi kale oo sababay dhimasho ama dhaawac qofeed oo ula kac ah; waxaa ku jira sidoo kale caawinta ama gacan ku siinta
Qof lagu xukumay ama loo xukumay dhalinyaro dambiilayaal ah shantii sano ee la soo dhaafay dembi ku saabsan ka baxsiga xabsi iyadoo lagu xad-gudbayo Minn. Stat. § 609.485
Qof loo wareejiyey taliyaha xabsiyada dembi looga baahan yahay in uu ku diiwaangashan yahay Minn. Stat. § 243.166
Qofka leh amar qabasho ama hayn sharci oo weli taagan,u baahan in arrintaasi la xalliyo
Qof leh wax ka yar 13 bilood oo ka harsan muddada xabsigiisa
Qof lagu dhigay go’doon (segregation) ama lagu daray waqti ciqaabeed oo dheeraad ah muddadiisa xabsi 90-kii maalmood ee u dambeeyey
Qof hadda leh ciqaab rasmi ah oo la hakiyey
Qof hadda u xiran xukun ka yimid gobol kale ama Maraykanka guud ahaan
Qof hadda u xiran xukun ay ku jirto kordhin ciqaabeed oo maxkamaddu samaysay
Qof buuxiya mid ka mid ah shuruudaha khasabka ah ee kormeerka adag ee sii-daynta (ISR): 1. Heerka 3aad ee Guddiga Dib-u-eegista Dhammaadka Xabsiga (ECRC); 2. Qalabka qiimaynta halista dambiyada ee Minnesota (MNSTARR) oo muujinaya in suurtogalnimada dambiyo rabshado aan galmo ahayn tahay 30% ama ka badan; ama 3. Qalabka MNSTARR oo muujinaya in suurtogalnimada dambiyo galmo soo noqnoqda tahay 4.3% ama ka badan..

Shuruudaha Caafimaadka Maskaxda iyo Caafimaadka Jirka:

Dhamaan codsadayaasha u qalma CIP waa in ay ku gudbaan dhammaan baaritaannada caafimaadka maskaxda, caafimaadka jirka, iyo tababarka jirdhiska (physical fitness screenings) ee ka dhaca MCF-Moose Lake ama MCF-Shakopee ka hor inta aan lagu darin CIP. Ragga codsada waxaa lagu samayn doonaa baaritaan ku saabsan xasilloonida caafimaadka maskaxda iyo xaaladaha caafimaad ee jirka ka hor inta aan loo wareejin MCF-Moose Lake.

Haddii aad xiisaynayso oo aad aaminsan tahay in aad buuxinayso shuruudaha iyo heerarka gelitaanka, fadlan dib u eeg Heshiiska Barnaamijka Marxaladda 1aad (Phase 1 Program Agreement).

FADLAN BOGGAN HAYSO SI UU UGU MID NOQDO DIWAA NADAADA

Left Blank Intentionally

CODSIGA BARNAAMIJKA IYO HESHIISKA

Sida ku cad awoodda uu siinayo xeerka Minn. Stat. §244.17, aniga, **Magac: _____** , **OID:_____,**
iyadoo la tixgalinayo in la ii oggolaaday ka qaybgalka **Barnaamijka Xabsi Ciqaabeed (CIP)**, waxaan oggolahay shuruudaha iyo xeerarka hoos ku qoran:

1. Waxaan fahamsanahay in Marxaladda I (Phase I) ee CIP ay ugu yaraan tahay lix bilood isla markaana ay ku jirto jadwal maalinle ah oo si adag loo habeeyey iyo barnaamij ku salaysan daaweyn.

2. Waxaan aqbalayaa in la igu wareejiyo xarun kasta oo uu Taliyaha Waaxda Xeer-ilaalinta ama wakiilkiisu u magacaabo xarunta CIP.

3. Waxaan oggolahay inaan si buuxda uga qaybqaato oo aan guul ku dhammeeyo dhammaan shuruudaha barnaamijka isla markaana aan u hoggaansamo dhammaan xeerarka iyo qawaaniinta xarunta.

4. Mar kasta waxaan raaci doonaa tilmaamaha shaqaalaha barnaamijka..

5. Waxaan fahamsanahay oo aqbalayaa in jebinta xeer kasta oo xarunta ahi ay keeni karto in laga joojiyo xaaladda CIP lana celiyo Xarun Xabsi ee Minnesota (MCF).

6. Waxaan fahamsanahay in diidmada ama awood-darrida ka qaybgalka barnaamijka sida ay tilmaamaan shaqaalaha CIP, ama ururinta khaladaad yaryar oo barnaamijka ah, ay keeni karto in laga joojiyo xaaladda CIP lana celiyo MCF.
7. Waxaan oggolahay in la iga qaado baaritaan kaadida iyo/ama tijaabada cabbitaanka (breathalyzer) marka ay codsadaan shaqaalaha barnaamijka.
8. Waxaan ballanqaaday inaanan ku dhaqmin dabeecad weerar ama gardarro ah, dabeecad galmo, ku xadgudub galmo, aflagaaddo af ah, rabshado, ama hanjabaad rabshado.

9. Waxaan fahamsanahay in, inta aan ku jiro CIP, aan weli ku sii jiro xeerarka Anshaxa Maxaabiista ee Waaxda Xabsiyada (Department of Corrections Inmate Discipline Regulations for MCFs), isla markaana haddii aan qirto dambi ama lagu helo dambi sida ku cad xeerarka anshaxa, ay taasi noqon karto jebinta Heshiiska CIP.

10. Waxaan fahamsanahay in dadka ku xukuman ciqaabta khasabka ah (mandatory sentences) ay tahay inay dhammeeyaan muddada buuxda ee xabsiga ka hor inta aan laga sii deyn Marxaladda III (Phase III).

11. Ma hore ma uga qaybqaadatay CIP? (? (Fadlan ku wareeji jawaabtaada) Haa Maya
Haddii haa, immisa jeer iyo goorma?:_____

Haddii aad akhriday oo aad fahantay heshiiskan, <u>waa inaad sugtaa 60 maalmood kadib marka laguu oggolaado / aad iskaa uga baxdo / lagaa laabto oo lagu celiyo ka dib Marxaladda 1, 2 ama 3 si aad mar kale ugu dalbato CIP.</u> Marka aad gaarto 60 maalmood, buuxi codsigan oo saxiix, kadibna dib ugu soo celi. Markii la helo codsigaaga. **Marka la helo codsigaaga, faylkaaga waxa dib loo eegi doonaa muddo 60–90 maalmood gudahood, waxaana laguu soo ogeysiin doonaa go'aanka warqad boosto ah.**

Waxaan akhriyey ama la ii sharaxay shuruudaha, xeerarka, iyo baahiyaha kor ku xusan ee ka-qaybgalka CIP.

Waxaan fahamsanahay in aniga oo ka-qaybgalaya CIP aanan kasban doonin dhimis xukun inta lagu jiro Marxaladaha II iyo III ee barnaamijka. Waxaan fahamsanahay in haddii laga iga saaro CIP, la igu celin doono Xarunta Xabsiga ee Minnesota (MCF) muddo u dhiganta muddadii asalka ahayd ee xabsiga (original term of imprisonment), laga jaray dhimis xukunka aan hore u kasbaday (haddii ay jirto), hase yeeshee aan ka badnayn waqtiga ka haray xukunkeygii asalka ahaa. “Muddada Asalka ah ee Xabsiga” waxa loola jeedaa waqti u dhiganta laba-meelood-saddex (2/3) ee xukunkii maxkamaddu fulisay markii hore, laga jaray maalmaha xabsiga hore , haddii ay jiraan.

Sidoo kale waxaan aqbalayaa in shuruudahaan iyo xeerarkaan lagu dabaqi doono marka la ii oggolaado ka-qaybgalka CIP, isla markaana aan oggolahay in haddii aan jebiyo mid ka mid ah shuruudaha iyo xeerarkaas, mudnaanta ka-qaybgalka la joojin karo.

Waxaan intaas dheer oo aan fahamsanahay in xaaladda CIP la ii siiyey iyadoo lagu salaynayo macluumaadka la heli karo xilliga la ii oggolaaday. Haddii macluumaad soo baxo wakhti kasta inta aan ku jiro CIP oo sababi lahaa inaanan u qalmin, xaaladdayda CIP waa la joojin karaa, waxaana dib loogu celin karaa MCF.

Waxaan fahamsanahay inaanan loo oggolaan doonin Marxaladda II ee CIP ilaa Agaasimaha Barnaamijka CIP uu caddeeyo inaan si guul leh u dhammaystay Marxaladda I, isla markaana Hearings and Release Unit ay anshxiso xaaladda Marxaladda II.

Waxaan si buuxda u fahmay oo u aqbalay cutubyada kore.

_____ Taariikh: _____

Saxiixa iyo OID-ka Codsadaha CIP#

Magaca Shaqaalaha Maareynta Kiiska: _____ _____Xarunta:

Saxiixa Shaqaalaha Maareynta Kiiska: _____

Si aad u gudbiso codsiga barnaamijka iyo heshiiska la saxiixay, ku lifaaq labadaba foomamka “kite” oo u dir waaxda diiwaannada ee xaruntaada.